

Raac ilmahaaga (guumays)



Filimaan ku saabsan sida aad u arki karto oo aad ula socon karto waxa ilmuhu xiiseynayo, iyo sida aad isu waafajin karto adiga iyo ciyaarta si loo helo faham dheeraad ah.

Sidoo kale ka fikir

Marka aad muujinayso in aad fahmayso ilmahaaga, waxaa sidoo kale fiican **in aad**

ballaarisoo waxa ilmuhu samaynayo ama sheegayo, oo aad ka dhigto wax ka yar horumarsan.

Taasi waxay ka dhigan tahay in aad uga jawaabto heer wax yar ka sarreeya waxa ilmuhu isagu sheegayo ama samaynayo.

- Haddii ilmuhu kor u qaado shay, waxaad dhihi kartaa: “baabuurka” ama “eeg, BAABUUR!”
- Haddii ilmuhu farta ku fiiqo oo yiraahdo: “halkaas eey”, waxaad uga jawaabi kartaa: “haa, halkaas waxaa jooga eey, eeygu wuxuu ku dul socdaa cawska.”

Waxaan u baahanahay **inaan abuurno fursado badan** oo lagu tababarto isfahamka. Mudnaanta sii waqtiyada ciyaarta, laakiin ha iloobin in dhammaan xaaladaha maalinlaha ah loo isticmaali karo isfaham! Marka aan dharka xiraneyno, marka aan guriga u soconno oo aan ka imaaneyno xannaanada, ama marka aan karinayno oo aan cunayno cunto.



Isticmaal luqadda aad sida ugu fiican u taqaan marka aad la hadlayso ilmahaaga.

Kusoo jiid hadlid (dawacow)



Filim iyo macluumaad bixinaya talooyin ku saabsan siyaabo kala duwan oo aad ula ciyaari karto ilmahaaga.

Hoos ugu sii deg bogga ilaa qaybta “Filimka ku saabsan ciyaaraha fudud” iyo kaararka ciyaaraha ee ka yimid gobolka Uppsala.

La bilow ciyaar



Sidee uga caawin karaa ilmahayga inuu si badan u hadlo?

Hur kan jag hjälpa mitt barn att kommunicera mer?

Somaliska

Waxaa diyaariyey dhakhaatiirta hadalka iyo luqadda ee Daryeelka Caafimaadka Carruurta ee VGR, Febraayo 2026.
Sawirrada waxaa sameeyay Copilot

Muxuu ilmahaagu jecel yahay?

Carruurta yaryar way u fududdahay inay ka hadlaan oo ay ku xiriiraan waxyaabaha ay xiiseeyaan. Fiiri oo dhageyso! **Muxuu ilmahaagu jecel yahay?** Waxay noqon karaan waxyaabo, xayawaan, heeso ama ciyaar gaar ah, tusaale ahaan is eryasho.

Kadibna waqtiyada ciyaarta ku waafaji waxa ilmahaagu xiiseynayo.

U dhowow ilmaha.

Fadhiiso dhulka si aad ula joogto heerka ilmaha. Sidoo kale way fududaanaysaa in la raadiyo xiriir indho haddii aad isu dhowdhiin.

Waxaad **dhiirrigelin kartaa xiriirka indhaha** adigoo shay kor u haya ama tusaya meel u dhow indhahaaga.



Fadhiiso meel uu ilmuhu si fiican uga arki karo adiga iyo shayga aad diiradda saaraysaan labadaba. Waxaad ka fikiri kartaa in aad **u fadhidaan sida saddex-xagal oo kale**.

Carruurta qaar waxay ku qanacsan yihiin inay keligood ciyaaraan.

Waxaad ku dhowaan kartaa ciyaarta ilmaha adigoo ag fadhisanaya, kadibna **samaynaya sida uu ilmuhu samaynayo oo kale**, micnaha jilaya.



Joogso oo ka falceli / qabso waxa ilmuhu sameynayo ama sheegayo.

Sug jawaabta ama falcelinta ilmaha inta lagu jiro ciyaarta. U dhowow ilmaha, kuna muuji indhahaaga iyo luqadda jirkaaga in aad xiisaynayso waxa uu sameynayo.

Sug! Way fududahay in annaga dadka waaweynka ah in aan carruurta weydiino su'aalo badan oo aan degdegno, taasoo keeni karta in ilmuhu uu la socon kari waayo. **Sii ilmaha waqti iyo fursad uu isagu ku bilaabo ama ku qaado tallaabada koowaad.**



Marka ilmuhu si un u muujiyo inuu rabo wax dheeraad ah, markaas si degdeg ah uga jawaab. Waxay noqon kartaa in la sii dhiso waxyaabo, in la sii riixo lulidda, in la xadaxanteeyo, bogagga buugga la rogroggo, ama in buufin la buufiyo kadibna lagu sii daayo qolka dhexdiisa.

Iska dhig qof muhiim u ah ciyaarta dhexdeeda.

Adigoo door muhiim ah ka qaadanaya ciyaarta, waxaad abuureysaa fursado badan oo isfaham ah. Tusaale ahaan, adiga ayaa noqon kara qofka afuufaya xumbooyinka saabuunta, ilmuhuna wuu qarxin karaa. Kadib ilmuhu wuxuu muujin karaa inuu rabo wax dheeraad ah, ama adiga ayaa haysan kara dhammaan looxyada dhismaha ama qaybaha puzzle-ka, ilmuhuna wuxuu codsan karaa mid mid. Waxay taasi ilmuhu ku muujin karaa isagoo cod sameeya ama jirka ku muujiya.



Waxaad sidoo kale noqon kartaa “wax yar oo jidka ku go’an”, tusaale ahaan waxaad fariisan kartaa meesha ilmuhu tareenkiisa ku wado. Markaas ilmuhu waa inuu, ku eego, si uunna kuu tuso inaad meesha ka dhaqaaqdo. Tani waxay noqonaysaa hab lagu soo jiito dareenka ilmaha. Waxaad sidoo kale dhigi kartaa alaab ciyaareed meel qaanad sare ah, si ilmuhu kuu tuso inuu u baahan yahay caawimaad si alaabta looga soo dejiyo.